

### **Xafladdii loo qabtay tartarkii ardayda dhamaysey kitaabka arbaciinka xifdintiisa.**

Waxaa markizka Åbyhøj ee magalada Århus lagu qabtay maalintii axadda 1da bisha augosto 2010 xaflad loo qabtay ardey dhamaysay kitaabka arbaciin al-nawawi. Kitaabkaan 40-ka xadiith ka ah ayaa waxay ardeydani barteen fixdintiisa lafdiga carabiga iyo macniiisa soomaaliga ah. Dhalintan ayaa ka koonayd illaa 12 ardey oo ka faaiideystey bishii iyo barkii fasaxa ay kujireen.

Waxaa isna juhdi dheeri ah ku bixiyey oo wax baray ardeydaan oo sifiican isu xilqaamay Dr. Abdi Farah Taano oo runtii wakhtigiisa ugu deeqay dhalintaan ka dib markii uu arkay inay miradhali karto dedaalka ardeyda.

Dr. Abdi Farah ayaa wuxuu dhalintaan wakhtigiisa ugu deeqay markuu ka soo baxo maalinkasta shaqadiisii, marka laga reebo maalmaha uu leeyahay waardiyaha. Dr. Abdi ayaa wuxuu ka shaqeeyaa isbitaalka guud ee magaalada viborg oo runtii ka fog magaalada Århus.

Xafladdii tartanka ayaa waxay udhacdey sidaan :

Waxaa soo dhown kubilaabay guddoomiyaha markazka Årbyhøj ee magaalada Århus Cabdi Cali Sigad. Isagoo kubilaabay mahadcelin dadka faraha badnaa ee isugu jiray waalidiin, ardey, macalimiin iyo dadkale oo fara badan oo aad udanaynayey.

Waxaa intaa kadib waxaa kelimad wacdi ah oo tilmaamaysa ilmaha iyo sidii loogu tarbiyadeyn lahaa culuunta diiniga ah iyo tan maaddiga ah bak a soo jeedihey : Sheikh Cabdi Sahal oo ka mid ah macalimiinta markaz-kaan wax ka dhiga.

Waxaa hadalka la wareegey macalinkii baray caruurta kitaabkaan Dr. Cabdi Faarax oo sheegay waxyaalihii kudhaliyey inuu ardeydaan baro kitaabka iyo sababta uu ardeydaan uga doortay kuwa kale.

Wuxuu aad iyo aad u amaanay ardeydaan iyo waalinkii dhalay oo uu sheegay inay ahaayeen kuwo kusoo bixiyey dedaal aad iyo aad dheeraad u ahaa.

Intaas kadib waxaa la guda galay xafladii aadka u qiimaha badnayd oo ay ku bilaabeen ardeydu. Riwaayad yar oo ay ku macnaynayeen xadiith ka mid ah axaadiith tii ay soo qaateen.

Waxayna inataas kadib guda galeen tartakii oo xafidaadda, oo ay ardeydu bakhiyaa nasiib ku kula baxayeen axaadiihtta. Intaas dabadeed waxaa qilaabatay macnayntii ay ku macnaynayeen luuqadda afka soomaaliga ah.

Intaas kadib ayaa waxaa ardeydaas la gudoonsiiyey shaadooyin iyo hadiyado. Waxaa ugu dambayntii hadalo aad iyo aad wax ku ool ah ka soo jeedihey xafladaas, labo isin oo ka mid ah odayaasha magaalada Århus oo aad iyo aad u bogaadiyey una baraarujiyey arimaha noocan oo kale ah. Labadan odey ayaa kala ahaa: Imaam Rashiid Cabdi Guraa iyo Garaad Ciise Soofe Duraan.

Kadaawo film-kii laga duubay halkaan:

[http://www.youtube.com/watch?v=c\\_28R7YD1K4](http://www.youtube.com/watch?v=c_28R7YD1K4)

[http://www.youtube.com/watch?v=KbG-7eyaAiQ&feature=youtube\\_gdata](http://www.youtube.com/watch?v=KbG-7eyaAiQ&feature=youtube_gdata)



